

# Warka Cusub 2023-24 ee Qoysaska Marysville

Janaayo , 2023

Qoysaska Marysville ee qaaliga ah,

Kani waa war cusub ku saabsan qorshaynta barnaamijka Aqoonyahannada Ingiriisiga ee ka guuraya Lent una guuraya Marysville sannad dugsiyeedka 2023-24. Xusuusin ahaan, Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay u codeeyeen in barnaamijka Aqoonyahannada Ingiriisiga Lent ee loo guuriyo Marysville ee sannad dugsiyeedka 2023-24. Shaqaalaha degmada waxay rabeen inay hubiyaan inaad macluumaadka cusub ka heshay isbeddelkan.

## Waxbarashada Dheeraadka ah/Dugsiga Kadib:

Degmada waxay raadinaysaa inay kordhiso fursadaha xanaanada caruurta iyo kobcinta dugsiga kadib ee ardayda iyo dugsiyada ay saamaysay isdiiwaangelinta Koonfur-bari iyo dheelitirka barnaamijka. Waxaan aqoonsannahay qaar badan oo idinka mid ah inaad codsateen xanaanada dugsiga kahor iyo kadib. Shaqaalaha Degmada waxay la kulmayeen bixiyeyaasha si ay u balaariyaan fursadaha xanaanada caruurta 2023-24.

Waxaan u dirnay sahanno Diseembar 5, 2022 bulshooyinka Bridger, CSS iyo Lent. Iyada oo ku saleysan jawaabaha sahanka hadda, ku dhawaad 162 qoys ayaa codsaday xanaanada caruurta. Tirooyinka ayaa sidan u kala baxa:

- **67 qoys ayaa Bridger ka codsanaya xanaanada caruurta**
- **47 qoys ayaa Lent ka codsanaya xanaanada caruurta**
- **48 qoys ayaa Marysville ka codsanaya xanaanada caruurta**

Fadlan la soco in sahanka si rasmi ah u xirmay Arbacada, Diseembar 14, 2022. Waxa aanu qorshaynayna in aanu samayno qabanqaabada soo gudbinta dambe.

Waxaan hadda la shaqeyneynaa la-hawlgalayaasha si aan u qorsheyno danaha iyo baahiyaha ardayga iyo qoyska. Bisha Janaayo, waxaan qaban doonaa kulamo furan oo ay la-hawlgalayaasha kula wadaagi karaan qoysaska macluumaadka ku saabsan barnaamijyadooda xanaanada caruurta. Qorshaha hadda ayaa ah in kulankaan la qabto ugu dambayn toddobaadka 3-aad ee bisha Janaayo, si ay qoysasku u helaan jawaabaha su'aalhooda, waxaana rajeyneynaa, inay go'aanno ka gaaraan tallaabooyinka xiga.

Waxaan qof walba u rajaynaynaa Sannad Cusub oo Farxad leh, waxaan sii wadi doonnaa inaan soo dirno wararka cusub ku saabsan xanaanada caruurta marka waxyaabo badan oo gaar ah ay bilaabaan in la xalliyo.

Mahadsanid,  
Dr. Jon Franco